

# Mushaarka ugu yar

**MAINE**  
DEPARTMENT OF  
**LABOR**

Bureau of Labor Standards

Sharciyada Sharciga Shaqaalaha ee Gobalka Maine ayaa difaac siinaaya dadka ka shaqeeya Maine. Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa maamusha sharciyada, taasoo dhammaan loo shaqeeyaasha ay qasab tahay inay raacaan. Wakiillada waaxda ayaa kormeer ku samaynaaya goobaha shaqada si loo xaqiijiyo ku dhaqanka. Ganaaxyo iyo ciqaabo ayaa la saari karaa loo shaqeeyaasha aan u hogaansamin sharciga.



**Sharciga Maine (Farqada 26 M.R.S.A. § 42-B) ayaa qasab ka dhigaaya in loo shaqeeye kasta uu boorkaan ku dhajiyo goobta shaqada gaar ahaan meel ay shaqaaluhu si ficnan u arki karaan.**

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleenka ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

## Mushaarka ugu yar waa \$14.15 saacadii laga bilaabo Janaayo 1, 2024

### Mushaarka ugu yar

Sida ku cad sharciyada shaqaalaha ee Maine, ganacsi kasta oo ka shaqeeya gobalka lehna hal shaqaale ayuu si ootomaatig ah u qabanayaan sharciga gobalku Tan waxaa ku jira loo shaqeeyaasha dawlada iyo kuwa gaarka ah ayadoon laga eegayn faa'iidada soo gasha ama baaxadooda. Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, mushaarka ugu yar ee lagu qaato Maine waa \$14.15 saacadii.

### Xeerarka Mushaarka ugu yar ee Magaalada

Loo shaqeeyaasha ay u joogaan shaqaale ka shaqeeya Bangor iyo/ama Portland ama magaalo kale oo kasta oo ansixisa xeerka mushaarka ugu yar ee maxaliga ah, ayaa lahaan karta xeerar dheeraad ah waana in laga hubiyaa maamulka magaalada.

### Shaqaalaha Adeegga

Shaqaalaha Adeegga waa qof si joogto ah u qaata in ka badan \$179 bil kasta gunno ahaan. Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, loo shaqeeyaashu waa inay mushaar toos ah ku baxshaan ugu yaraan qiimaha \$7.08 saacadii shaqaalaha adeegga. Haddii mushaarka tooska ah ee shaqaalaha oo lagu daray gunnada aysan buuxin, asbuuc kasta, shardiga mushaarka ugu yar ee gobalka, loo shaqeeyuhu waa inuu bixiyaa baaqiga soo haray.

### Waqtiga dheeraadka ah

Ilaa in si gaar ah loo dhafo maahde, shaqaalaha waa in la siiyaa mushaarka shaqada waqtiga dheeraadka ah ee saacadaha ay shaqeeyeen oo ka badan 40 saacadood asbuucii laguna siiyaa qiimo aan ka yarayn qiimaha shaqada caadiga ah iyo barkiis oo dheeraad ah. Loo shaqeeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay diidaan ama aqbalaan shaqada waqtiga dheeriga ah, laakiin haddii waqti dheeri ah la shaqeeyo, waa in lacag lagu siiyo sida waafaqsan shuruudaha gobalka. Waqtiga magdhawga ama "kabista" ma adeegsan karaan shirkadaga gaarka loo leeyahay, inkastoo loo shaqeeyaasha ganacsiyada gaarka ah ay siin karaan shaqaalaha kala badalashada waqtiga asbuuca shaqada dhexdiisa (laakiin ma badali karaan waqtiga mushaarka haddii mudada mushaarku ka badan tahay mareegta todobo maalmood asbuuca shaqada).

### Si aad u hesho macluumaad dheeri ah, la xariir:

Maine Department of Labor  
Bureau of Labor Standards  
45 State House Station  
Augusta, Maine 04333-0045

**Taleefanka: 207-623-7900**

Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.

Webseetka: [www.maine.gov/labor/bls](http://www.maine.gov/labor/bls)

limeelka: [bls.mdol@maine.gov](mailto:bls.mdol@maine.gov)

### Shardi Dhaafyada Waqtiga Shaqada Dheeriga ah

Qawaaniinta Maine waxay tixraacaan shuruudaha mushaarka ee hoos yimaada Xeerka Halbeegga Shaqada ee Caddaaladda Leh (FLSA). **Shardiga mushaarka ugu yar ayaa noqon doona \$816.35 doolar toddobaadkii inta u dhexaysa 1-da Janaayo, 2024 iyo 30 Juun, 2024. Laga bilaabo 1-da Luulyo, 2024 shardiga mushaharka ugu yar ayaa noqon doona \$844 doolar toddobaadkii.** Mushaarku keliya waa hal arrin oo loo adeegsado go'aaminta in shaqaalaha laga dhafo saacadaha dheeraadka ah sida waafaqsan sharciga dawladda dhexe ama gobolka. Waajibbaadyada saaran shaqaale kasta waa in loo tixgeliyaa inay qayb ka yihiin falanqayntan. Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo labada shuruudood—marida tijaabada waajibbaadyada iyo halbeegga mushaarka ee toddobaadlaha ah—ayaa xadgudub ku ah sharciga gobolka waxaana suurtagal ah inay xadgudub ku tahay sharciga dawladda iyadoo ku xiran farqiga u dhexeeya sharciyadda.

### Bayaanno Ku socda Shaqaalaha

Loo shaqeeye kasta waa inuu siiyaa shaqaale kasta cadaynta mushaaraadka la bixiyay oo si cad u muujinaysa waqtiga mudada mushaarka, saacadaha la shaqeeyay, mushaarka guud iyo lacagaha laga jaray.

### Diiwaan Haynta

Loo shaqeeyaashu waa inay hayaan, muddo sadex sano ah, diiwaannada saxda ah ee saacadaha la shaqeeyay iyo mushaarka la siiyay dhammaan shaqaalaha.

Waaxda Shaqaalaha ayaa fulinaysa sharciyada mushaarka iyo saacada ee gobalka. Loo shaqeeyaasha su'aalaha ka qaba sharciga waxay wici karaan 207-623-7900 ama waxay booqan karaan webseedka waaxda.

### Tusmada Mushaarka ugu yar

[www.maine.gov/labor/labor\\_laws/minimum\\_wage\\_faq.html](http://www.maine.gov/labor/labor_laws/minimum_wage_faq.html)

[legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html](http://legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html)

### Tusmada Waqtiga Shaqada Dheeriga ah

[www.maine.gov/labor/labor\\_laws/overtime.html](http://www.maine.gov/labor/labor_laws/overtime.html)

[legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html](http://legislature.maine.gov/statutes/26/title26sec664.html)

**\*Ogoow:** Shaqaalaha reer Maine ayaa sidoo kale difaac ka helaaya Sharciga Heerarka Caddaalada Shaqaalaha ee Federaalka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir Xafiiska Mushaarka iyo Saacada ee Waaxda Shaqaalaha Maraykanka ood ka wacaysa 603-666-7716.